Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

3-5

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- ENG Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Inta aan la seexan ka hor, aynu samayno wada-hadal, akhrino, qorno hawl. Doorobuug kastaoo aad gurigaku haysato.Akhrijaldigaoo ku casuun ilmahaaga inay ka hadlaan waxay ka og yihiin mawduuca.
- Kadibna si wadajir ah u akhriya hal bogoo buuggaah. Hadda,weydii ilmahaaga inuu aqoonsadoxaqiiqada, liisgaree dhacdooyinka oo qor ra'yi ku saabsanwaxay akhriyeen.

Qorshaha shaqada guriga

- Toddobaadkan, samee xusuus-qoraha akhris-qoraalka qoyska oo wata waraaqo jeex ah si aad ugu darto hawlo qoraal ah oo aad guriga ku samayso.
- Canugaagu ha u qaybiyo xasuus-qoraha qaybo.Waydiiinayu qoraancalaamado qaybaha kala duwan si waafaqsan maaddo/fasal kasta oo ay hadda ku qaadanayaandugsiga.

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Aan ka wada hadalno waxa saxamadeena ku jira. U oggolow inuu ilmahaagu ka hadlo haddii ay leeyihiin **miro, khudaar, hadhuudh, ama borotiinka.**
- Isticmaal xasuus-qoraha akhris-qoraalka qoyska si aad ugu qorto jumlado qeexaya waxa saxankooda ku jira. Tusaale:Muuskuwaa miro.Borokoligu waa_____ . Bariisku waa _____ . Digaagu waa cunto borotiin ah.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Ka hadal wax ku saabsan **bandhiga TV-ga ama filimka** aad ugu jeceshahay. Soo saar xasuus-qoraha akhris-qoraalka qoyska.
- Weydii canuga inuu qoro 3 sababood oo qoysku ay tahay inay u daawadaanbandhigga. Isticmaal jumlad bilaawayaasha: 'Waxaan aaminsanahay in _____ .''Sida fikradayda ah, _____ .' 'Markaan daawado kan, waxan awoodnaa _____.'

Qorshaha banaanka

- Weydii canugaada inuu qoro liiska raashinka aad u baahan tahay ka hor inta aadan tagin dukaanka.
- U oggolow inay u habeeyaan cuntada 5 qaybood oo kala duwan: miraha, khudaarta, badarka, borotiinka, iyo caanaha. Markaad ku sugan tihiin dukaanka, weydii canuga inuu ka soo xusho 2 shay qayb kasta Salaan! oo

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Daabac khariirada caasimadaada/magaaladaada oo soo qaado markaad raacayso baska ama baabuurka. U isticmaal taleefankaaga beddel ahaan.
- Ilmahaaga ha eego khariirada. Intaad sii socoto, weydii su'aalo ku saabsan meesha aad joogto: 'Waamaxay dhismayaasha ku yaalo dhanka bidix/midig?' Horay ma u tagnay meeshaas? Xagee ayaan u soconaa?"

Wakhti walba!

- Qoyska oo dhami ha ka qaybqaataan sheeko shaqsiyeed oo silsilad ah (qayb kasta waxaa qoraya qoraa kale oo ka sii qaadaayo meeshii qofkii hore uu kaga tagay).
- Ilmahaaga ha bilaabo sheekada. Dabadeed qaar kale waxay ku daraan jumlad sheekada ilaa dhamaadka. Isticmaal jumlada bilawga ah sida: Waligay ma ilaawi doono wakhtiga marka_____. Waxaas oo dhan bilaabay markii____. Kadib__.

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

3-5

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Soo qabso buug ama sheeko kasta uu ilmahaagu hore u akhriyey.
- Weydii canugaada inuu sheego laba qayboodoo kamid ahsheekada: qisada iyo goobta.Qisadawaxay qeexaysaa "waa maxayda" sheekada. Waxay u ogolaanaysaa akhristaha inuuogaadowaxa dhacaya. Goobtu waa xarunta iyo aaggamuuqaalka ah ee wakhtiga ay qisadaadu dhacayso

Qorshaha shaqada guriga

- Kahor inta aadan sameynin shaqada guriga, canugaada ha ku qoro qoraalo xusuus-qorahooda akhris-qoraalka qoyska oo ku saabsan waxa ay u baahan yihiin inay u qabtaan shaqada guriga.
- Ha ku qoraan qoraalada luqadaada hooyo. Tani waxay ka caawin doontaa inay qorsheeyaan, la socdaan oo ay si fiican u habeeyaan barashada luqadda akadeemiyadeed

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Buugga xusuus-qorka akhris-qoraalka ee qoyska, ku qor qaybaha cunto karinta: cinwaanka, sharraxaadda, diyaarinta iyo wakhtiga karinta, maaddooyinka, iyo tallaabooyinka.
- Canuga ha qoro cuntada ka hor ama ka dib wakhtiga cashada. Ku dar cunto karinta toddobaad kasta oo ismaddadaali.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Dheel ciyaarta sabab iyo saamayn leh. Ku qor 5 jumlad warqad la jaray oo tilmaamaysa sabab (tusaale ahaan, waxaan cunay jalaato aad u badan)
- Canugaagu ha qoro 5 jumladood oo tilmaamaya saamaynta (tusaale ahaan, caloosha ayaa i xanuunaysa. Ha iswaafajiyan sababaha iyo saamaynta)

Qorshaha banaanka

- Haddii ilmahaagu maanta asxaabtiisa la aado beerta, sii jeex warqad ah iyo qalin.
- Weydiisu'aaloay kamid yihiin:Haddii aad kaga tagtay bur baraf ah marshabiyoodka kulul inta lagu jiro xagaaga, maxaa dhici lahaa? Hadii aadan waligaa ilkahaaga cadaysan, maxaa dhici lahaa?

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Markaad guriga gaari u soo wadato,kala hadal sababaha iyo saamaynta dhacdooyinkakaladuwan.
- Weydiisu'aaloay kamid yihiin:Haddii aad kaga tagtay bur baraf ah marshabiyoodka kulul inta lagu jiro xagaaga, maxaa dhici lahaa? Hadii aadan waligaa ilkahaaga cadaysan, maxaa dhici lahaa?

Wakhti walba!

- Ka daawo goosgooska gaaban ee buuggaan barta You tube "Marka xiddiguhu kala firdhooban" https://shorturl.at/djqvy. U deji xawaaraha YouTube-ka 0.75.
- Buuggani waa sheeko-faneed (xooga sheeko dheer). Canugaagu ha qoro 3 jumladood oo uu ku alifayosheekada inteeda kale

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Qorshaha qoyska ee akhris–qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

ENG Ingiriis isticmaal

Luuqadaada hooyo isticmaal

Hi! 嗨 Hola! Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

3-5

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Canugaagu ha eego qaar ka mid ah alaabaha daryeelka shakhsiyeed ee aad ku isticmaasho guriga (tusaale ahaan, cadayga, shaambada, qaboojiyaha, marista)
- Waydii inay eegaan inay alaabadaasi leeyihiin tilmaamo ku qoran af Ingiriis iyo luqadokale.Xarfahalabada luqadoodba ma isku mid baa? Ma jiraa kelmad ay ka garanayaan luuqadaas?

Qorshaha shaqada guriga

- Ka wada hadla waxa uu yahay mowduuca casharrada guriga ee maanta. Kaararka ku qor jumlado mawduucaas la xiriira una dhig si aan kala sooc lahayn. Weydii canuga inuu weedhaha u habeeyo si farqad dhammaystiran.
- Dooro hal jumlad oo ha ka qoraan cutub ku saabsan mawduuca oo la xiriira jumladaas gaarka ah.

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Markaad wax karinayso, ka codso canugaada inuu dhaqo khudaarta ama miraha.
- Ka wada hadla sida ay u kala duwan yihiin/iskugu mid u yihiin dhaqidda suxuunta iyo dhaqidda khudaarta. Ha qoraankala duwanaanshahaas. Ka caawi ilmahaaga adiga oo weydiinaya su'aalo ay ka mid yihiin: Ma waxaan isticmaalnaa saabuun ama soodhada khamiirinta? Ma waxaan isticmaalnaa isbuunyo/burush?

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Soo hel ereyo af Ingiriis ah iyo luqadaada hooyo oo leh dhawaaq isku mid ah. Samee kaar ay ku qoran yihiin erayadaas. (tusaale ahaan, kelmadda See ee af Ingiriiska waxa uu u dhawaaq eg yahay erayga Si ee Isbaanishka. Macnahooda way kala duwan yihiin).
- Dheh kelmadaha oo arag haddii ilmahaagu kala saarikaro waxa ay yihiin kelmadda aadsheegayso. Ha qoraan jumlado iyagoo isticmaalaya kelmadahaas.

Qorshaha banaanka

- Ilmahaagu ha qoraan kaararka Ramadaanka, Ciidda ama Christmas-ka. Qaar ka mid ah jumlad bilaaayaasha waxay noqon karaan: Miyaad ku_____. Waxaan ku rajaynaya _____. Waxaan kuu sii diraya _____. Farxad _____.
- Booqo kaniisadda/masaajidka xaafaddaada oo u oggolow canugaada inuu qaybiyo kaararka.

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Markaad gaari wadato ama saaran tahay baska, kala hadal magacyada dhismayaasha aad ku aragto agagaarka.
- Waydii ilmahaaga inay magacyada ku yaqaaniin afkooda hooyo. Tusaaleahaan, dugsiga waxa af Isbaanish lagu dhahaa escuela.Isbitaalnawaxaa af Jabbaan lagu dhahaa byoin). Maxaa kale oo aad aragtaa?

Wakhti walba!

- Soo hel ereyo af-Ingiriis isku qaafiyad ah, sida cook - book, play - clay, iyo time - slime.
- Canugaagu ha la yimaado kelmado badan oo la qaafiyad ah erayada kore. Ka dib marka aad haysato liis, weydii iyaga inay qoraan gabay gaaban (tusaale ahaan, Time flies when you play with slime).

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

Qorshaha qoyska ee akhris–qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

3-5

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Ilmahaaga maanta ka qaybgeli dhar dhaqida. Ha sameeyaan dhammaan tallaabooyinka ay ku maydhaan oo ayna ku waraayaan dharka.
- Ha ku **qoraan summado** si ay u habeeyaandharkooda.Kalahadal meeshadharkala gelinaayo.Tani miyaa la gelinaya armaajada dharka dunta ah? Ma waxay galaysaa khaanadaha?

Qorshaha shaqada guriga

- Dooro mawduuc la xiriira shaqada guriga ee ilmahaaga, sida qaabdhismeedka dhirta, oo ay ku jiraan xididada, caleemaha, jirridda, miraha, ubaxyada, iyo iniinaha.
- Isticmaal Google si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo la xiriira mawduuca. Weydii su'aalo ku saabsan akhriska adigoo isticmaalaya su'aal lix kelmadood ah (sida, yaa weeye, waa maxay, sababta, goorma, halkee, sidee).

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Maanta,keen warqadiyo qalimaan miiskacuntada.
- Halkii aad hadli lahayd, adiga iyo qoyskaaga waxaad qori doontaan wax kasta oo aad rabtaan inaad midba midka kale u sheegto. Isticmaal luqadaada hooyo ama Ingiriis. Kaliya isku maddadaali! Ku dar xarakaynta wada hadalka marka loo baahdo sida calamadaha layaabka (!), xigashooyin (''), hakad (.).

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Miyay jirtaa odhaahyo ku qoran afkaaga hooyo oo leh mid Af Ingiriisi ah oo u dhiganta? Tusaale ahaan, Isbaanishka A taste of his own medicine waxay la macno tahay '"Estar probando su propia medicina"
- Canuggaagu ha ku qoro odhaahyo Af Ingiriis ama afkooda hooyooo u dhiib xubnaha kale ee qoyska inay soo helaanturjumaada.

Qorshaha banaanka

- Marka ilmahaagu dibadda joogo oo uu la ciyaarayo carruurta kale, soo qaado warqad iyo qalimaan si aad ugu **ciyaartaanciyaarta kala bixinta jumlada.**
- Hal qof ayaa qoraayo jumlad; Qofka ku xiga ayaa beddelayo kelmadda ugu dambaysa ee jumlada kuna darayokelmadcusub.Tusaale: Waxaan jeclahay inaanaado beerta. Qofkaku xiga: Waxaan jeclahay inaan dugsiga la aado...

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Markaad baabuur wadato ama aad baska raacayso, ka hadal buugaagta ama bandhigyada aad dhawaan wada akhrideen/daawateen.
- Canugaagu ha u hindiso buugga ama bandhiga dhammaad cusub. Maxaa dhici lahaa haddii _____? Ha isticmaalaan male-awaalkooda oo ha ku maadaystaan!

Wakhti walba!

- Daawo 2-da daqiiqo ee ugu horeysa "Island Born" oo kor u akhri (www.youtube.com/watch?v=y8i2nitmt04).
- Kala hadal sababta Lola u garan wayday waxa lagu sameeyo shaqada guriga. U oggolow inay qoraanjawaabta. Ka caawi adigoo siinaya jiridka jumlada: Iyadoo ku salaysan tuducda, waxaan u qaadan karaa taas... tusaale ahaan...

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

ALLOhio

Qorshaha qoyska ee akhris–qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

3-5

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Canugaaga la qor sheekadaada gaarka ee wakhtiga jiifka.
- U soo bandhig ilmahaaga su'aalo taxane ah oo luuqadaada hooyo ku qoran una ogolow inay ku qaabeeyaan sheekadaAf Ingiriis.

Qorshaha shaqada guriga

- Markaad samaynayso shaqada guriga, dooro mawduuc kasta oo ilmahaagu ka akhrinayo dugsiga.
- Canugaaga ha qoro khariirad qeexid fikradeed oo ku aadan mawduuca:



Qorshaha wakhtiga cuntada

- Ma leedahay cunto qoys oo aad ku samayso munaasabadaha gaarka ah? Ka fakarwaxa ay taasi noqon karto.
- U sheeg ilmahaaga sheekada ka dambaysa cuntadaas. U ogolow inay qoraan tilmaamaha iyo maaddooyinka si aad labadiinuba u karisaan wakhtiga xiga.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Ciyaar ciyaarta xujada. Qaado erayada heesta oo ku beddel falal (ereyo ficil ah) oo leh sawir matalayaficilka.
- Canugaagu ha akhriyo erayada oo ha ku qoro kelmadaha meesha sawirka. Tusaale ahaan, waxa uu noqon karaa wadis/waditaan. Dhagayso heesta oo arag inta kelmadood ee ay heleen.

Qorshaha banaanka

- Sii ilmahaaga tamaashiir marka aad dibadda u baxaysan.
- Waydii inay sheeko ku sawiraan marshabiyoodka. Halkii aad wax qori lahayd, ilmahaagu waxa uu sawiri doonaa sawiro u taagan dhacdooyin taxane ah oo sheekadooda ku jira. Ha kuu sheegaan sheekadaka dib markay dhameeyaan wax sawirista

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Markaad dugsiga ka soo kaxaysanayso, ilmahaagu ha qoro liis ay ku qoran yihiin waxa la qabanayo oo ah waxay u baahan yihiin inay sameeyaan markay guriga yimaadaan.
- U ogolow inay isticmaalaan ereyada ishaarka ee Ingiriisiga: Marka hore _____xigta____kadibna____goor dambe_____Ugu dambaystii.

Wakhti walba!

- Ka dooro sheeko gaaban oo ku qoran luqadaada hooyo ama Af-Ingiriis laga soo xigtay www.uniteforliteracy.com
- Weydii canugaada inuu sheekada u qoro dhammaadyo ka duwan. tuducda, waxaan ku qiyaasi karaa taas... tusaale ahaan

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____